

ILAALINTA DANTA GUUD

Ummadda Soomaaliyeed waa bulsho dhaawac laxaad leh gaadhay sodonkii sano ee la soo dhaafay iyo weliba xilligii gumaysiga. Bulsho meel ku noolna lagama waayayo mid liita, mid aqoon la'aan hayso, mid waxsoosaarkiisu liito, mid calaan ah, iyo mid naafo ah. Sidaas darteed waxaa shirkadaha ganacsiga, dugsiyada gaarka ah, rugaha caafimaadka ee gaarka ah, iyo iskaashatooyinka laga rabaa inay masuuliyad iska saaraan bulshada inteedada liidata si caafimaadkooda loo daryeelo, waxbarashadooda loo ilaaliyo, isla markaana noloshooda loo ogaado.


Somali nation needs to control humanitarian and development activities for both private and public sectors to ensure that their daily activities are comply with the laws, ethical responsibility and social responsibility of objectives and conditions laid down.

Society cannot grows only to seek profit and to become individualism, but we need to seek conformity, unity, social cohesion and thinking as a nation to develop ourselves and the whole community. We need organisations that have ethical and socially responsible objectives like the IEA which is based on its beliefs on how one should treat the environment and people who are less fortunate. Organisations will not run only to generate a profit but provide a service to the public. This service will need to meet the needs of the less well off in society or help improve the ability of the economy to function: e.g. cheap and accessible transport service, health care, education, food, shelter, etc.

Bulshada Soomaaliyeed waxay u baahan tahay inay dhawrto oo illaaliso arrimaha samafalka iyo arrimaha ganacsiga ee dalka ka dhex socda si loo hubiyo in dhaqdhaqaaqoodu waafaqsan yahay anshaxa suubban ee bulshadu u baahan tahay, isla markaana inay la yimaadeen masuuliyadii loo baahnaa ee bulshadu ka sugaysey. Bulshadu horumar kuma samayso in qof kastaa dantiisa gaarka ah eryado oo keliya. Bulshadu waxay horumar ku samayn kartaa Allah ka cabsi, tubtii Nebigeena oo la raaco, ilaalinta diintaada, ilaalinta hiddaha suubban, madhxinta dhaqanka suubban, dhawrista anshaxa suubban, dhawrista xishoodka, dabarka nafta, wadanimo, dan guud jirid, iskaashi, wadaag, dadkaaga daryeelkiisa oo laga shaqeeyo, horumarka dalkaaga iyo dadkaaga, garashada taariikhdaada, dalkaaga oo daacad loo noqdo, dan iyo degaan.

Maanta waxaad moodaa in qof kasta eryayo dantiisa gaarka ah oo la halmaamay dantii guud. Laakiin sidaas ma ku sii jiri karnaa? Jawaabtu waa maya. Muhimada danta guud leedahay waxaa in badan inaku booriyey Nebigeena (scw). Nenigeenu wuxuu yidhi qofkii aan arrimaha Muslimiinta dananayn naga mid ma aha. Sidoo kale wuxuu nebigeenu yidhi: qofka wuxuu Allah u gargaaraa intuu u gargaarayo walaalkiisa Muslimka ah. Nebigeena waxa kale oo laga sheegay inuu yidhi: qofku waa inuu walaalkiis la jeclaadaa waxa uu naftiisa la jecel yahay. Sidaas awgeed ilaalinta danta guud waa arrin lama huraan ah in la isu taago.

Waxyaalaha ummadda ka leexiya danta guud waxaa ka mid ah anshax xumada. Anshaxu waa mabda'a ugu muhiimsan nolosha aadamaha. Anshaxa toosan iyo dhaqanka wanaagsan waa calaamadaha muhiimka ah ee lagu yaqaan horumarka bulshada toosan. Markaa in mudnaan gaar ah la siiyo toosinta anshaxa qofka iyo bulshada waa shay aad u muhiin ah, waayo wuxuu anshaxu koobaa nolol maalmeedka gaarka ah iyo kan guudba. Marka anshaxa bulshada xumaadana waxaa lagu yaqaan dhac, tuugo, dhilaysi, dil, iskaashi la'aan, laaluush, ku xadgudub xoolo dadweyne, iyo xadtooyo.



ILAYS EDUCATIONAL ACADEMY

Anshaxu waa asluubta ama xeerarka wanaagsan ee qofka ama bulshadu ku kala garato waxa wanaagsan iyo waxa xun, ama waxa saxa ah iyo waxa khaladka ah. Sidoo kale waxaynu anshaxa ku qeexi karnaa xeerarka asluubta toosan ee xukuma qofka iyo camalkiisa. Anshaxa qofka waxaa xukuma qalbiga qofka. Haddii qofka qalbigiisu dakhramo waxaa dhacda in qofkaas aqbalo shayga xun oo uu wanaag u arko; isla markaana uu xumaan u arko shayga wanaagsan.

Rasuulka Allah (scw) wuxuu inoo sheegay in jidhka qofka ay ku jirto waslad yar oo cad ah, haddii wasladaasi hagaagto qofka iyo jidhkiisa inta kale way hagaagayaan; haddii wasladaasi xumaatana qofka iyo jidhkiisa inta kale way xumaanayaan. Nebigu wuxuu intaas ku daray in wasladaasi tahay qalbiga qofka weliba isagoo farta ku fiiqaya laabtiisa.

Xadiiska Nebiga waxaynu ka fahmaynaa in haddii qofka qalbigiisu xumaado in qofkaasi noqonayo mid xumaanta aqbala, wanaagana ka dheeraada. Haddii qofka qalbigiisu caafimaadqabo waxay keenaysaa in qofkaasi noqdo mid wixii wanaagsan aqbala, wixii xuna ka dheeraada. Sidaas awgeed ansha qofka ama bulshada waxaa wanaagiisa lagu ilaalin karaa iyadoo qalbiga qofka daawo loo helo. Weydiinta meesha taal waxay tahay: Sidee baa caafimaad loogu heli karaa qalbiga qofka?. Weydiinta jawaabteedu waa fududahay oo waxaynu odhan karnaa haddii qofka ama bulshada laga helo arrimaha soo socda qalbiga wanaagiisa daawo ayaa loo helayaa. Arrimahaas oo ah kuwa soo socda waxay keenaan in qofka ama bulshada anshaxeedu tooso.

Qofka ama bulshadu waa inay ku toosnaadaan asalka diinta Islaamka. Taasi waxay keenaysaa in qofka noloshiisa ama bulshada nolosheeda loo helo qiyam (criterion) ma guuraan ah si loo yareeyo welwelka iyo walbahaarka nolosha adduunyada. Sidaas darteed in asalka diinta Islaamka la raaco waxay keenaysaa in qofka ama bulshada loo helo xeerar negi oo nolosha dhidibada u aasa.

Qofku waa innuu la noolaadaa Qur'aanka. Qur'aanka oo ah manhajka Allah dunida ugu talagalay illaa Qiyaamaha wuxuu qofka dhimirkiisa ka safeeyaa denbiyada iyo gefefka ka dhaca. Sidaas darteed waxaa Qur'aanka lagu qeexi karaa daawada 1aad ee qalbiga qofka.

Qofku sidoo kale waa inuu raaca sunnada Nebiga (scw). Nebigeenu wuxuu xiddiddada u aasay wax kasta oo ummadda Islaamku raaci lahayd sida: qiyamka ummadda, qiimaha ummadda (Islamic value), caadooyinka ummadda, anshaxa ummadda, habka dhaqandhaqaale ee ummadda Islaamka, iwm. Sidaas daarteed waa marjaca ugu ballaadhan ee qofka muslimka ahi ka heli karo daawo kasta oo noloshiisu u baahan tahay.

Sidoo kale qofka dhimirkiisu wuu isbedelaa haddii uu ka durko saddexda qodob ee aynu soo sheegnay. Markaa waxaa loo baahan yahay in qofku qalbigiisa ku cusboonaysiiyo Qur'aank iyo kutubta caqiidada ee baraysa Allah jiritaankiisa, weynidiisa, iyo nolosha adduunka.

Marka afartaas arrimood iyo kuwo kale la helo waxaa ka abuurma in la helo qof anshax suuban oo jidka Allah ku taagan, isla markaana adkaysi iyo dulqaad u leh inuu xaliyo dhibaatooyinka la soo darsa. Ummadda ka kooban shakhsiyaadka noocaas ah waxay noqonaysaa ummad qorshaysan (planned nation) oo u dhugmo yeelata horumarka bulshadeeda iyo daryeelka manhajkeeda.